**XAQ-U-DIRIRKII AAN XUDUUDDA LAHAYN**

**Ibraahin Sheekh Saleebaan**

**1944kii – 2006da**

"Awrka didibso baan idhi,
Nacaskana dud baan idhi,
Kelidii danaystaha,
Daribtii intuu cunay,
Naga raba durduurtee,
Waxba deeqi waayeen,
Is-na dhagax-dixeed iyo,
Deebaaq liq baan idhi,"

**Ha dacwiyin Denbiiloow,**

**Ibraahin-gadhle, Jabuuti,**

**30/3/1980kii,**



Ilaahay ha u naxariisto

**Qalinka: Boobe Yuusuf Ducaale – cankaabo@hotmail,com**

Fadhi-shaqo oo aanu Xarunta Akaademiga ku lahayn ayaan ku daahay. Si dhaqankayga qayilaadeed ka baxsan ayaan goor danbe oo ay saacaddu ku beegnayd ilaa 8.45 saacadood ee habeennimo ka soo kacay. Nin aanu saaxiibbo iyo hawl-wadaagba nahay oo dhoofayay ayaan u sii qaaday hudheelka Maansoor oo uu deggenaa. Waa 29kii Jeeniweri, 2006da. Waxaan soo hoyday Koongo iyo Senegaal oo kubbad ciyaaraya oo ay Senegaal leedahay laba gool. Haddan fadhiistay oo aan isu diyaariyay in aan wax aan badnayn hawl-galo ayuu Aw Yuusuf oo carruurtayda ka mid ahi tilifoon soo dhacay ii dhiibay. "Waa ayo?" Waxa ii xigay: "Waa Gurraase". Cod aad u hooseeyay oo murugo iyo tiiraanyoba lahaa ayuu iigu sheegay in Ibraahin-Gadhle Jabuuti ku dhintay oo lagu aasay. Miyaanan maqlayn mise dhegta ayaa is-diidsiinaysay. Mooyi. Mar, laba iyo saddex jeerba waan ku celiyay. Halkiisii iyo warkiisii ayuu ku adkaystay. Anna xaqiiqsaday in saaxiibkay Tukaale socday. Tukaale, wuxu ahaa magac uu Riwaayad ku jilayay oo halhays iyo halkudhegba u noqday carruurtayda. In badan ayay iga codsadeen in aan Tukaale baro. Fursad aanan helin marka laga reebo Ayaanle oo aan maalin uu dhoofayay garoonka dayuuradda isku baray. Gurraase ayaan mar kale su'aal dib ugu noqday oo aan weydiiyay halka uu kasoo hadlayo. Ku-ye: "Haatuf ayaan joogaa". Gurraase, wuxu I weydiiyay wax kooban oo ku saabsan taariikh-nololeedkii Ibraahin-Gadhle, Ilaahay ha u naxariistee. Anna waxaan ugu jawaabay in ay taasi baadhis iiga baahan tahay, Ibraahinna aanu ahayn nin aan si fudud u geli karo qoridda taariikhdiisa. Wax aan badnayn sidaana u buurnayn ayaan markii u sheegay

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved

Gurraase, aniga oo aan hagranayn. Waxaan se dareemay in aanu Gurraase ku qancin.

Sidaa ayuu warkan naxdinta lihi igu soo gaadhay. In yar markaan fadhiyay ayaan haddana saaxiibkay Xaashi la hadlay, waxaanu ii sheegay in uu go'ay Ibraahin 29/1/2006ka, mar ay saacaddu ku beegnayd 4.30 subaxnimo, isla maalintiina waxa lagu aasay Jabuuti. Naxariistii Janno Ilaahay ha ka waraabiyo, innagana samir iyo iimaan ha inaga siiyo.

Intaa ka dib ayaan xusuus ugu noqday Ibraahin Sheekh Saleebaan. Waxa markiiba igu soo dhacday goortii araggiisa iigu danbeysay. Waxay ahayd maalmihii ololaha doorashadu socday. Waxay ahayd bishii Sebtember horraanteedii, 2005tii. Goor barqo ah ayaan hor maray xafiiska Daallo. Askarigii baabuurta kala horayay ayaa na joojiyay. Dhinaca midig ayaan eegay mise waxa taagan Ibraahin-Gadhle oo xidhan isku-joog kaakiya. Gabadh aan is-idhi isaga ayaa dhalay ayaa xagga bidix ka taagnayd. Markaan isha ku dhuftay, ayaan aniga oo baabuurkii ku jira u dhawaaday oo aan ku idhi: "Cajuus". Kaftan-wadaag aan kala xanaaqin ayaanu ahayn. Hadal ayuu is-yidhi. Haghago aanan ku aqoon jirin ayaan ka dareemay. Waxa kale oo aan dareemay in uu ka itaal-daran yahay intii aan ku aqaannay. Naxdin. Gaadhigii intaan dhigay ayaan kasoo degay. Waxa ii xigtay Ibraahin oo dhaqaaq holladay bal se aad mooddo in uu lug iyo gacan wax ka qabo in kasta oo uu keligii tallaabsanayay. Gabadhii ayaa ku soo dhawaatay oo gacanta qabatay. Xaqiiqsaday in Ibraahin buko aniga oo aan garan sida loo helay. Naxdintii ayaan ku booday oo isku duubay. Labadii gacmood intaan dhabarka ka mariyay ayaanu madax iyo luqunba is-dhaafsanay. Si daayay si uu Ibraahin iigu warramo. Wuxu ii sheegay in dhiig-kar awgii dhinac la bakhtiiyay oo uu dhowr bilood yaallay cisbitaal Dubay ku yaal, bal se immika uu ka soo doogay oo iska ladan yahay. Gabadhii oo garab taagan ayuu iskaaya baray. Waxa igu soo dhacday miyaanu wiilal lahayn, haddana waxaan isku qanciyay in ay mar walba habluhu wiilasha qaneecaad dhaamaan. Naxariisna iyaga ayaaba lagu og yahay. Wiilasha qudhooda ma nebciye, waa se sida loo badan yahay. In aan sii qaado ayaan damcay, waxay se ii sheegeen in ay baabuur wateen. Maa daama aan ogaa in uu gurigoodii Qudhac-dheer ku soo dego, waxaan u sheegay in aan u iman doono.

Mar kale ayaa markaa iiga danbaysay. Markan Buurco ayaanu ku kulannay. Maalmihii ugu danbeeyay ololihii doorashada ayaan goor fiid ah soo galay Hudheelka Gabay-xaddi ee Burco. Markiiba qof hudheelka joogay ayaa ii sheegay in uu Ibraahin-gadhle sakaaraad yahay oo qol hudheelka ka mid ah jiifo. Dhankaa iyo dhankaa aniga oo aan deyin ayaan markiiba qolkii la iigu tilmaamay ku cararay. Wuu jiifaa, waxaana dul tuban dad aan badnayn oo uu ku jiray nin dhgakhtar ahi. Dahkhtarku wuxu doonayay in uu dhiiggisa qiyaaso, bal se agabkii ayaanu haysan. Isla markiiba tu aan sitay ayaan la soo cararay oo lagu qiyaasay. Caadi ayuu iska ahaa, bal se dhakhtarkii wuxu ku taliyay in cisbitaalka Burco la seexiyo si looga war hayo, sidii ayaana lagu qaaday. Habeenkii ayaa araggiisa iigu danbaysay. Markii aan Hargeysa ku soo nqoday ayaan gurigii uu degganaa habeen ka doonay, waxaana la igu war geliyay in uu Jabuuti ku noqday. Waxa ii qorshaysnayd in aan

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

maalmahaa wax kaga duubo halkii uu deggenaa, Ilaahay baan se qaddarin. Waxaan se kaga calool-fayoobaa aniga oo ogsoonaa in Ibraahin suugaantiisii qoraal ku diyaariyay oo ay xaal-xaal yar mooyaane daabacaad sugaysay.
Waa muuqaalkii iigu danbeeyay ee aan u lahaa Ibraahin-Gadhle, naxariistii Janno Ilaahay ha ka waraabiyo e'. Maqal aan maqlo xadayn kari maayo xilligii iigu horraysay. Aragga se waan muddayn karaa oo markii iigu horraysay waxaanu ku kulannay magaalada Muqdisho. Waa maalmihii ay socotay Deelleeydu oo uu Jabuuti ka yimid, safar gaabanna Muqdisho ku yimid. Deelleeyduba waxay socotay Diisambar, 1979kii ilaa Abriil 1980kii. Ibraahin laba tixood oo dhamacda ka kulul ayuu ku lahaa Deelleeyda.

Waxa ii xigtay mar 1982kii Jabuuti ku sugnaa oo aan u qalab-qaadanayay sidii aan uga qayb qaadan lahaa halgankii hubeysnaa ee ay SNM horseedka ka ahayd. Xilliyadaa Ibraahin dukaan cajaladaha lagu kala duubo oo Boodhari la odhan jiray ayuu ku lahaa Xaafadda afraad meel galbeedka kaga beegnayd. Waxaan xusuustaa in aan ka sii iibsaday 11 cajaladood oo Deelleeydii ahaa oo aan dhammaantood ku garaacay mar aan deggenaa magaalada Cadan, gaar ahaan Hudheelka Xaafadda Tawaahi ku yaal ee la yidhaahdo Bisha ama "Crescent Hotel". Berigaa waxa kale oo aan Jabuuti ka sii duubtay nin aanu saaxiib ahayn oo la yidhaahdo Xasan Wadaad ilaa 40 cajaladood oo kale oo heeso ahaa. Sahaydii ugu buurnayd ee aan halganka u sii qaatay ayay ahayd. Maanta keydkayga cajaladaha, laba cajaladood oo keliya ayaa kaga sii hadhsan cajaladahaa. Midi waa cajaladdii koowaad ee Deelleeyda, cajaladda kalena waxa ku jira heesihii 26kii Juun ee 60kii. Mar labaad ayaan Jabuuti kasoo duubtay cajaladihii Deelleeyda oo dhan.

Ibraahin Sheekh Saleebaan oo loo yaqaannay Ibraahin-Gadhle, wuxu ku dhashay magaalada Jabuuti 1944kii. Hooyadii waxay ahayd Shaqlan Caynaanshe. Wuxu ku barbaaray magaalada Jabuuti oo uu ka galay malcaamad-quraan. Ibraahin-Gadhle markii uu barbaaray wuxu ka hawl-galay Dekedda Jabuuti oo uu ka shaqayn jiray 1955kii ilaa 1967kii. Wuxu u wareegay dhismaha oo uu ku hawlanaa 1967kii ilaa 1978kii.

1978kii, wuxu hawl ka bilaabay Radio Jabuuti halkaas oo uu ka shaqayn jiray ilaa 1984kii. Intii xilligaa ka danbeysay, Ibraahin-Gadhle wuxu ku hawlanaa ganacsi iyo ka-qayb-qaadashadii halgankii hubeysnaa ee dibuxoreynta Qaran ee SNM horseedka ka ahayd, isaga oo ku sugnaa jiidaha hore ee dagaalka 1988kii ilaa bilowgii 1991kii oo dalka laga xoreeyay nidaamkii Siyaad Barre.

Ibraahin wuxu ahaa halabuur curin iyo farshaxanba lagu majeerto. Been ku hadli maayo haddii aan idhaahdo haldoorka Jabuuti ayuu ahaa oo cidna laba kuma ahayne, raqamka koowaad ayuu ka ahaa. Heerarka Soomaaliyeed marka aynu u nimaadno, Ibraahin foolaadka xulka ah ayuu ku jiray. Gude iyo dibad maansooyinkiisa, heesihiisa iyo Riwaayadihiisuba waa ay maaxeen.

Dhammayn kari maayo e', bal aan mid iyo laba kasoo qaato Riwaayadahiisa caan-baxay:

1. Nolol geeridu dhaanto,
2. Marti in aad Ilaahay u tahay,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

3. Halgankii ummadda iyo hoog Isticmaar,
4. Ragow aarsi haween u adkaysta markiinna,
5. Waa la moodaye, ma aha,

Maansooyinkiisa halkan kuma wada tixi karayo e', bal aan heesaha wax aan badnayn kasoo garoocdo. Hoobalkii codkiisa malabku cawryay ee Maxamed Mooge ayaa intaba ku luuqeeya. "Dadka ha iska weyneyn", waa koow, "Maxaa deyr-cad", waa laba, "Waagoow dhakhsoo", waa saddex. Miyaan sii wadaa. Mar kale ayaan isku deyi in aan ku soo noqdo.

Ibraahin wuxu guursaday saddex haween ah oo kala ah:

1. Sahra Jaamac oo leh 2 gabdhood iyo hal wiil,
2. Saado Ibraahin oo leh 5 gabdhood iyo 3 wiil,
3. Maryan Maxamed oo leh 2 gabdhood iyo 3 wiil,

Waa sagaal hablood iyo toddoba wiil iyo hooyooyinkood. Waxa kale oo uu Ibraahin ifka kaga tegay Diiwaankii Maansooyinkiisa. Maa-shaa Allaa. Ilaahay ha ka abaal-mariyo.

Ibraahin wuxu noolaa nolol hodan ah oo uu kaga soo qayb-qaatay halgankii Jabuuti iyo kii dibuxoreynta Qaran ee SNM horseedka ka ahayd. Af iyo addinba wuu ku dagallamay, waxaanu ahaa qof aragti cad oo muuqata ka lahaa labadaa halganba. Ma ay ahayn aragti qarsoon oo isaga ku kooban, bal se waxay ahayd mid ku dheehnayd suugaantiisii iyo curintiisaba oo si fudud looga daalacan karo. Intiinna taqaannay mooyaane, waxaan jeclahay in aan intiinna kale idin baro Ibraahin Sheekh Saleebaan aniga oo idiin kala dab qaadaya. Run ahaantii Ibraahin ayaa is-kiin baraya, bal se doorka aan is-barashadan ku leeyahay ayaa noqonaysa in aan idiin soo qabto hadba tuduc ka mid ah maansooyinkiisa si aad u garataan aragtidii uu nolosha iyo halgannadii is-daba joogayba ka lahaa.

Waxaan adeegsanayaa Maanso uu ugu wanqalay **DIRSOOC** oo uu ka tiriyay Shirweynihii 6aad ee SNM, 2dii bishii Abriil 1990kii, kaas oo ku qabsoomay meel woqooyi kaga beegnayd Balli-gubadle.

Aynu ku horreeyno aragtidii uu Ibraahin ka lahaa Maansada ama sidii uu arkayay curinta, waxaanu yidhi:

"Maansooy nin kugu duul,
Ninna maalin kugu dood,
Ninna derejo kaa dhigay,
Ninna dhuuni kugu doon,
Ninna nabarka kugu damaq,
Ninna dakharka kugu dhayay,
Ninna doogta kugu kici,
Ninna waranka kugu demi,
Ninna nabadda kugu didi,
Ninna belada kugu deyr,
Ninna dookha caashaqa,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Kaa dhigay def looo tumo,
Oo ka doorkan joogiyo,
Dura gabayadii jiray,
Intuu heesta kugu daro,
Jaceyl kugu dalaandali,
Marna darayamuus iyo,
Dhaclihii dunta ahaa,
Aduu kuu direysy yahay,
Dumar kugu buraanbure,
Maansooy duciyo kheyr,
Ninka kugu dareershiyo,
Dabka ruuxa kugu shiday,
Ninba doorku kula rabay,
Dareenkiisa kugu mari,
Boodhari dabuubtuu,
Ku dardaarmayuu yidhi,
Waa dhaxal dadweynaha,
Diiwaanka ugu yaal,
Waana lagaga daydaa,
Anna kuma dayacayee,
Dunidaan ku barayaa,
Waxan dooday kugu shubi,
Dhegihii dalooloo,
Waxa lagugu daabici,
Dugsiyada tacliintoo,
Goobaha dalxiiskaa,
Lagaa daawan doonaa,

Maansooy dulqaad badan,
Maanta kii ku deyrshaa,
Berritoba ku doon-doon,"

Bal immikana aan dhuuxno aragtidii Ibraahin ee Midnimadii 1960kii lagu sameeyay Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed markii la isku daray labadii Gobol ee Ingiriiska iyo Talyaanigu kala gumeysan jireen. 31 sannadood ka dib isaga oo ku jira halgan hubeysan oo dibuxoreyn Qaran ah, ayuu dhacdadaa 1960kii aragtidiisa ku wajahan ka jeedinayaa Shirweynihii 6aad ee SNM, waxaanu yidhi:

"Taariikh da' weynoo,
Degmadeenu leedahay,
Aan idiin dul-xaadshee,
Lixdankii dadkaygoow,
Markaad Dawladnimadii,
Diiqada u bixiseen,
Degdegsiinyo mooyee,
Doqonniimo ma ahayn,
Manaydaan denbaabine,
Shanta kala dab-raacdaa,
Dermo qudha ah u gogosheen,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Isku-duubnideenniyo,
Daacad baw horseeddeen,
Geeluba hadduu dido,
Duq baa loo hoggaanshaa,
Sida loogu deyduu,
Geesina u diriraa,
Anna laba-daryaalii,
Waxaan Daacad uga baxay,
Dhulku yaanu Daaliyo,
Dooloow u kala go'in,
Siday labada daamood,
Dab u wada kulaalaan,
Dibi keliday lay qalay,
Qoys qudh ah dibbiradii,
Waxa aan ka door-biday,
Duubiga shan lagu cuno,

Webiga I dig siiyiyo,
Badda aan ku dalow idhi,
Waxa daacad igu daray,
Marka aad degtaan meel,
Dixi iyo caleen badan,
Kuwa kaa danbeeyiyo,
Intaad diir wadaagtaan,
Berri doogga ugu yeedh,
Ama uga digniin noqo,
Dalluun loogu talo-galay,

Shaxda kama il-duufine,
Sidaan damacsanaa iyo,
Sida Dooddi yeelaa,
Kala durugsanaatoo,
Deyrtii hillaacdiyo,
Deydo curashadeedii,
Dooggii ku soo baxay,
Diir iyo wax baa cunay,

Xeedhadaan daboolee,
Aan malabka doocaan,
Ugu shubay dadweynaha,
Doqon baa harratiyay,
Isagana dariiqii,
Abees daallinaa yimid,
Aar baa docdii galay,
Daryaankiisii laga yaac,
Kuwaan soo duwaay idhi,
Dubur Hawd ka kala gale,
Ninka Duuda yaal baa,
Ugu dhow dadkeennii,
Wuxu deyrka ugu dhigay,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Siduu dararta Maandeeq,
U durduurto kelidii,
Duul urursanaadiyo,
Midnimaanu doonayn,
Haddaan duubi wada jira,
Dedaalkaygii lagu helin,
Dar Allee abaalkii,
Waxa dumay ku suuree,"

Bal hadda immikana aan daalacanno Ibraahim oo dadka ku disaya dhagartii laga galay, isaga oo si farshaxannimo iyo halabuurba leh u tidcaya maansada. Waxa la yaab leh muuqaallada, hummaagyada iyo sawirrada uu sida maadda iyo dhiilladaba leh u taxayo. Intii uu maansadaa Shirweynaha ka tirinayay yaab, naxdin, iyo qosolba waa la isku daray. Allahu Akbar ayaa lagu badhxayay oo dhex taal looga dhigay tuducyadii uu tirinayay. Marka aad maqal iyo muuqaalba ku daawato ayay jidhiidhaco kugu jajabaysaa. Bal Ibraahin oo si kale isu kiin bara aan uuga baxo, waxaanu yidhi:

"Laba daan dhexdood iyo,
Dalqo bahal qof galayoo,
Dirqi iyo tu fool adag,
Dibadda ugu soo baxay,
Halkii shalayto lagu dilay,
Ma dareemi waayee,

Durba miyaa illoowdeen,
Dunideennii dhacantiyo,
In uu deynkii maqan yahay,

Durba miyaa illoowdeen,
Nimcadii dalku lahaa,'
Kuwuu daajinaayiyo,
Kuwii deyro laga dhigay,

Durba miyaa illoowdeen,
Xeerkii dalka u yiil,
Kuwii uu deldelay iyo,
Kuwuu daaya odhan jiray,

Durba miyaa illoowdeen,
Xoolihii dadweynaha,
Kuwii la yidhi daldalo iyo,
Ninkii shilinka lagu dilay,

Durba miyaa illoowdeen,
Adigoo dibbiray cadho,
Ku-sii digashadiisii,

Durba miyaa illoowdeen,
Hablihii dednaa iyo,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Dibadaha-u-saarkii,
Maalintii dadkaygoow,
Dabo-gaabta loo xidhay,
Durba miyaa illoowdeen,
Dhaqankii la doorshiyo,
Diintii la dabo-rogay,
Maalintii dadkaygoow,
Ragga dumarka lala simay,
Sow dorraato ma ahayn,
Xaqa kuwii daliishiyo,
Markuu culimadii dilay,

Durba miyaa illoowdeen,
Waqti aan digaag hoyan,
Dadkeennii xeroon jiray,

Durba miyaa illoowdeen,
Dhiiggii la daadshiyo,
Wixii dooxa meyd yiil,

Durba miyaad illoowdeen,
Dayuuradii lalaaayee,
Dusha kaa rushayn jiray,

Durba miyaa illoowdeen,
Madfacii la dirayee,
Orodoo dadweynaha,
Deydayo la odhan jiray,

Durba miyaa illoowdeen,
Daleeddaan wadhnayn iyo,
Dib-u-weerarkiisii,"

Curinta maansadu wax hawl yar ma aha. Curinta ka sokow, waxyaabaha kale ee la qiimeeyo waxa ka mid ah sida uu halabuurku u taxo amaba u xidhiidhiyo arrimaha kala duwan ee uu ka hadlayo. Bal hadda mar kale aynu dheehanno aragtidii Ibraahin-Gadhle ee ku wajahnayd cududdii hubeysneyd ee SNM ama Mujaahidiintiiba. Isaga oo Shirweynihii 6aad la hadlaya, Ibraahin-Gadhle tuducyadan soo socda ayuu ku sifeeyay Mujaahidiinta iyo kaalinta halbowlaha ah ee ay kaga jireen halgankii hubeysnaa ee dibuxoreynta Qaran ee SNM horseedka ka ahayd. Bal u fiirsada sida farshaxannimada iyo quruxdaba leh ee uu Mujaahidiinta u qiimeynayo. Wuxu yidhi:

"Ka ku jira dagaalkuna,
Dantaad adigu leedahay,
Mid ka sii da' weyn ma leh,
Haddaan aqallo kaa dumin,
Is-na daari kama dhicin,
Haddaan dahab lagaa guran,
Is-na dollar kama lumin,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Haddaan laydin dili jirin,
Is-na lama dagaalayn,
Hayeeshee xil baa diray,
Badda lagu dul-tuuruu,
Ka dabbaalo leeyahay,
Xaggu dalow xaggani duud,
Xagga kale dix iyo buur,
Bal doc uu u dhaqaaqiyo,
Degel lagu baqdaan jirin,
Diintaa ku tidhi dhimo,
Inuu samo ku daaqiyo,
Inuu daaddegaw siman,
Wedkaad adigu diidduu,
U diyaar-garoobee,
Ragga cadowga daafaca,
Wuxu daanka geliyiyo,
Hubka lagu dagaallamo,
Dhan kastaba u doonoo,
La dul jooga weeyaan,
Kuwii iil ku dubuq yidhi,
Denbi-dhaaf Allaa lehe,
Janno inay durduurtaan,
Daa'in inaan u barinoo,
U ducayno weeyaan,"

Ibraahin-Gadhle, sidee ayuu u arkayay nidaamkii lala dagaallamayay? Bal aynu aragtidiisii tuducyadan **DIRSOOC** ku jiray ka dheehanno, waxaanu yidhi:

"Nin ku dagay markii hore,
Oo ku dilay markii xigay,
Ka-digtoonidiisay,
Dooddani ku faraysaa,

Shalay doonnideennii,
Wada koray dadweynuhu,
Hadduu dirawalkeedii,
Kelidaa deg kugu yidhi,
Waqtigaa is-doorshee,
Maalintaad u deni tahay,
Isagana daruurtiyo,
Dusha sare ka soo tuur,

Ninkii dabinka kuu dhigay,
God dheer kuu dallaalimay,
Dalluun kuugu talo-galay,
Isagana dab nooloo,
Danbas lagu hagoogiyo,
Digo in aad u qarisay,
Dooddani ku leedahay,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Deebaaq qadhaadh iyo,
Dalqadaba waxaan gelin,
Nin durduuro kugu yidhi,
Dacar inaad u qooshtay,
Dooddani ku faraysaa,

Daandaansi-badanaa,
Duhur kuu badheedhee,
Dibirooti kuu dhigay,
Libta looma daayee,
Dacatiga dhirbaaxada,
Inaad kaga danbeysey,
Dooddani ku leedahay,

Haro daafta joogtiyo,
Isagoo ku jira daad,
Kii harraadka kugu dilay,
Waqtigaa is-doorshee,
Marka roobku kuu da'o,
Durdurkiyo xareedaha,
Docda adiga kuu yaal,
Is-na kalaxa haw darin,

Gurigaad dalaysiyo,
Daartaada kii riday,
Inaad kiisa dumisay,
Dooddani ku faraysaa,

Wuxuu ruuxba kugu deyay,
Adiguna ku daw-mari,
Dubbe lagugu jiidiyo,
Damqashada ogeysii,"

Ibraahin aragtidiisu gurgur qaanso kuma ay dabranayn ee daaqsin geel iyo tahan ayay ka shisheysay. Halgankii hubeysnaa ee uu ku jiray mid rixin-goys ah oo aarsi dibaaq oo keliya ku qotoma ma ahayn. Wuxu ku jiray halgan naxariis iyo dadnimoba ku dheehan tahay oo Diin iyo dhaqanba aan ka arradnayn. Bal aynu eegno dibuheshiisiinta iyo isa-saamaxa aragtidii uu ka lahaa. Intaas oo keliya ma aha e', bal waxaad aragtidaa Ibraahin ku cabbirtaan dawgii aynu dibudhiskeenna, hubdhigistii iyo horumarkeennaba u soo marnay. Ibraahin isaga oo mowduucaa ka hadlaya wuxu yidhi:

"Hayeeshee dulqaadkiyo,
Saamaxaadda Diinkuna,
Waa dariiqo kuu furan,
Sharciguna ma diiddana,

Kaadida dameerkiyo,
Hadduu daamur kaa kale,
Dusha uu iskaga shubay,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Adiguna tu doofaar,
Isku daadi kuma odhan,

Xumo xumo ku daahiri,
Yaan doodda laga dhigin,
Doqon iyo nin liitiyo,
Yaan jaahil lagu dayan,
Dab munaafaq uu shiday,
Ayaan daacad lagu gubin,
Dugsi ma leh qabiilkuye,
Yaan dallaayad laga dhigan,
Dabuubtii marxuumkii,
Ku dardaarmay weeyaan,
Ama Deelley nagu tidhi,
Dacar dhiilka lagu shubay,
Malab uga danbaysii,
Denbigana ninkii galay,
Keligii dusha u saar,"

1992kii markii uu Gaarriye tiriyay maansadii Ergo, ayuu Ibraahin-Gadhle isaga oo jooga Jabuuti ka soo jawaabay. Aniga oo aan maanta halkan ku soo wada tixi karayn maansadii uu Ibraahin ku jawaabay, bal waxaan jeclahay in aan wax aan badnayn halkan ku soo qaato. Waxa kale oo aan jeclahay in aan dareenkiinna iyo indhihiinnaba ku soo jeediyo sida la yaabka iyo quruxdaba leh ee Ibraahin u soo qaatay sheekada waraabaha. Bal waa tan intii aan jawaabtaa Ibraahin ee Ergo idiin ka soo garoocay. Wuxu yidhi:

"Aayihii Hadraawoow,
Ina Sugulle Caliyoow,
Cabdi Aadan Qaysoow,
Gaarriyoow ma-iishoow,
Anigoo Ibraahina,
Aaraarta mansada,
Iqra iyo Watiin iyo,
Alif baan ku furayaa,
Ammintay cir-jiidhiyo,
Afogaalle Nuuroow,
Ururrada caddaystaan,
Ayduba habeenkii,
Way uubateeyaan,
Fiintuna abaaraha,
Iyo eelka daba yaal,
Way ka sii ilmaysaa,
Ammin-khayfta fiidkii,
Iyo oogga waaberi,
Igadhkii maqaar lihi,
Markuu oon la saro kaco,
Ololkeeda Maadeys,
Geeddi kama adkaystee,
Mar haddaan irmaankii,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Cid ururisaa jirin,
Mar haddii agoomii,
Kii uruurin laa dilay,
Aniguna alhuumada,
Afrikada dhex socotiyo,
Xilliyada abaaleys,
Kama aammusaayee,

Waxan odhanayaa maye,
Axdiga iyo dhaartii,

Waxan odhanayaa maye,
Ididiiladii shalay,
Iyo ulashadeennii,

Waxan odhanayaa maye,
Ummaddii mideysnayd,

Agagaarka Seyliyo,
kolkay Ununuf joogeen,
Ama aagga buuraha,
Ama Eexo iyo Cayn,
Ama Awdal iyo Xeeb,
Ama dee Allaybadey,

Waxa ay ahaayeen,
Ciidammada asaaggood,
Kuwa ugu awood badan,
Mana lumin asluubtuye,
Istiqlaal markuu yimid,
Kuwa kala irdheeyaan,
Amankaag ka qaadee,
Dadkan aayahoodii,
Laga dhigay Ayaanloow,
Bad aleelo lagu shubay,
Marka ambaq tuugo ah,
Amaah loogu keenaba,
Maxay uga af-rogayaan,
Malaa oohintoodaa,
Ajar looga qorayaa,

Abbaanduulayaashii,
Ina soo abaabulay,
Shalay ololaheenniyo,
Orta iyo ciyaaraha,
Addin bay ku tumayeen,
Midna Iimay buu jiray,

In ammuurtu taa tahay,
Aan idiin asdeeyee,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Ayaxii hadduu tegay,
Ugxantaa dillaacdaa,
Ummadda u markhaatiya,

Waraabaa ayaan yidhi:
Haddaa igu ogeydeen,
Baadida islaankiyo,
Anoo aaran geel cuna,
Iimaan la'aantii,
Allaa iga hadeeyoo,
Istaaqfurulla baan idhi,
Aammin baanan kala baxay,
Magacii inkaarnaa,

Isaga oo ujeeddo leh,
Orgi baa nin gawracay,
Indhashuu u sudhay laan,
Waa ammaanadaadee,
Sii ilaali buu yidhi,

Markuu tegay islaankii,
In yar haddii u maqan yahay,
Agagaas dhurwaagii,
Ambo-qaad tallaabada,
Hadba soo ogaal durug,
Eekee hilbaa dagan,
Ursay jeenyihii hore,
Wuxu yidhi udgoonaa,
Amarroow markii xigay,
Af ballaadhan kala qaad,
Carrab oomman soo saar,
Awlallada ka leef-leef,
Wuxu yidhi Alleylehe,
Oon xalaal ah baan helay,
Aad buu cantuugada,
Adhaxda uga buuxsaday,
Kol ay araracdii tahay,
Alamtii laf iyo jiidh,
In yar neefki kama tegin,

Duqa imashadiisii,
Eedeysanii bood,
Ooddiyo dhirtii jiidh,
Erey baa se laga helay,
Ku arooray maahmaah,
Isagoo ordaayoo,
Afar-qaadayuu yidhi,
Waxad igu ogaataan,
Wixii aan ahaan jiray,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Gaarriyoow ma iishoow,
Uf qabiilki aad tidhi,
Hadduu adiga kuu uray,
Rag ku uunsadaa jira,

Markuu se aarku soo ciyo,
Haddaan eelo-weyntiyo,
Aarankaygu iga didin,
Waan ka aarsan laa doqon,
Inta se ay afkaartiyo,
Aragtidu mideysnayn,
Nacas wayga adag yahay,"

Intii uu noolaa ayaa mar Ibraahin lagaga duubay cajalad Video ah dalka Imaaraadka, gaar ahaan magaalada Dubay. Barnaamajkaas dhammaadkiisii ayaa Ibraahin la weydiiyay su'aal ahayd, maxaad dadweynaha kula dardaarmaysaa. Ibraahin wuxu ku jawaabay tixdan **Miimleyda** ah ee soo socota. Bal hadda u fiirsada hummaagyada iyo muuqaallada aan adkayn, haddana uu sida fudud ee farshannimada leh u dhigay. Kaas ayuu ahaa Ibraahin Sheekh Saleebaan. Suugaantiisuna taas ayay ahayd. Wuxu yidhi:

"Midigtaadu yey noqon,
Mid tolkeed u muruq weyn,

Murjinkaagu yuu noqon,
Magli dila walaalkii,

Magacaagu yuu noqon,
Mid xumaan ka marag-kaca,
Sida macawisaa qaar,
Ninba maalin yuu xidhan,
Hadba kii muraadle ah,
Hawga dhigin maqaar-saar,

Mar waxaad dhandhamisiyo,
Mijin qaad ah haw dhiman,
Hana talin masiibiyo,
Wax makhluuqa kala dila,

Maskaxdaadu yay noqon,
Maqal lagula leeyahay,
Yaan toban muftaax iyo,
Lagu furan masaabiir,

Waxaad shalayto mudatiyo,
Mahadhada xusuusnoow,
Halkii qorigu kaa muday,
Mar labaad lugtaadiyo,
Cagtu yaanay kula marin,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Maantiyo dantaadiyo,
Yaan mililku kaa lumin,
Maalmaa danbeeyiyo,
Waxa maqanna faallee,

Maalkaagu yuu noqon,
Musdanbeedka reerkiyo,
Makhsinkaad u hoyatiyo,
Masallaha Rasuulkiyo,
Ku Masaajid lagu gubo,
Muhmal laguma guuree,
Danni ma-hure haw dilin,
Maan fayow ha ceebayn,
Ha marmarin waxaan jirin,
Maamuuska sharaftana,
Ka ilaali meydhaan,
Miyirkiyo hubsiintuna,
Maro weeye la huwado,

Marantida haweenkana,
Hodan lagama maarmee,
Marba kii aroosiyo,
Ha maaweelin qayrkaa,
Adiguba marwada dumar,
Meher waad ku geydaa,
Miinxiiska ruux kale,
Waxa kaaga magac-roon,
Ha laguu mashaxaradee,
Adigoo mid guursada,

Gool meesha lagu qalay,
Mud haddaan lagaa siin,
Mandharaari cunisteed,
Waxa kaaga magac roon,
Ma-dhaafaanka hilibkiyo,
Adoo meydhaq deydaya,

Macfal la isu soo baxay,
Haddi anad muftiga noqon,
Mowliidka ka akhriya,
Maamuus la’aantii,
Waxa kaaga magac roon,
Machad laga aflaxayiyo,
Adigoo maqaam fura,

Geela maalintii raac,
Makhribkiyo habeenkana,
Aan kugu ag maalee,
Ha maggaabin caanaha,
Maaheyska kugu yidhi,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

Sii mililiciisaa,
Waxa kaaga magac roon,
Macaluusha gaajada,
Haba laga masoobee,
Adigoo markaha rida,

Gebegabada sheekadan taariikhiga ah ee aan ku gawl-gawlayo suugaantii iyo noloshii saaxiibkay Tukaale ama Ibraahinba, bal immikana wax aan badnayn idiin ka soo qaado loollan suugaaneed oo dhex maray Yam-Yam iyo Ibraahin, labadoodaba Ilaahay naxariistii Janno ha ka waraabiyo e'.

Ibraahin oo SNM ka tirsanaa iyo Yam-yam oo daafacayay nidaamkii Siyaad Barre waxa dhex maray afar maanso oo ay isugu jawaabayeen. Waa taariikh oo naxli iyo turxaan midna ugama jeedo. Yam-yam oo aanu qudhiisa saaxiib ahayn wuxu nagu soo maray Hargeysa intii aanu dhiman oo uu dhowr bilood nala joogay. Waxa nasiib wanaag ahayd in ay berigaa Hargeysa ku kulmeen oo ay wada joogeen Ibraahin-Gadhle in badanna qayilaad iyo qedoba wadaageen. Yam-yam cidina Hargeysa kuma guhaadin waxna looma raacin bal se si gobannimo iyo qaddarinba leh ayaa loogu soo dhaweeyay looguna sooryeeyay.

Soo hadal-qaadka tixahan ay is-weydaarsadeen Ibraahin iyo Yam-yam waa taariikh bal se xumaan ugama gol lihi.

Yam-yam ayaa tixaha ku horreeyay oo bilowgii tiriyay tix uu ku magacaabay "Ina Gaado-ku-nool" oo uu SNM-ta ula jeeday. Siduu hordhaca maansadaa ku sheegay wuxu ugu dabbaal-degayay Heshiiskii dhex maray Mengistu Xayle Mariam iyo Maxamed Siyaad Barre ee 1988kii. Tuduc maansadaa ku jiray oo Yam-yam lahaa oo Heshiiskaas lagu muunaynayay ayaa odhanayay:

"Gudgudaa I miray xalay,
Daruur baa I guud timid,
Wixii haro galsho lahaa,
Xareed baa ka galac tidhi,"

Ibraahin maansadaa Ina Gaado-ku-nool ee Yam-yam wuxu kaga jawaabay tix uu ugu wanqalay Gar-naqsi. Aniga oo aan halkan ku soo wada qaadan karayn maansadii oo dhan, bal aan idiin soo qabto tuduc jawaab u ahaa tuducaa Yam-yam oo odhanayay:

"Gariir baa ku miray xalay,
Madfac baa ku guud yimid,
Wixii haro galsho lahaa,
Dhiig baa ka galac yidhi,"

Intaas oo keliya ma ahayne, Yam-yam ayaa haddana soo diray tix kale oo magaceedu ahaa: Dhux-tagoogo. Mar kale iyo marar kale oo badanba Ilaahay labadoodaba ha u naxariistee, Ibraahin ayaa tixdaana kaga jawaabay tix kale oo uu u bixiyay Tuhun-reeb. Waqti kale oo intan ka faro badan marka aan

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 

helo ayaan ku yar hakan doonaa afartaa maanso ee jawaabta isu ahaaba, haddii Eebbe idmo.

Sidii ayuu Ibraahin-Gadhle goobihii suugaanta iyo saanaddaba la isku hummaajiyay kaga soo baxay isago oo guulasytay oo goofaaf iyo xarrogaba sanka taagaya. Naxariistii Janno Ilaahay ha ka waraabiyo, wanaaggii uu Soomaali u galayna ha ka abaal-mariyo.

"Saddexdaa heessood ayuu Maxamed Mooge qaadaa iyaga ayaana hirgalay. Aniguna aad iyo aad baan noloshiisiina ugu mahad-naqi jiray, immikana waxaan leeyahay Ilaahay ha u naxariisto. In badan ayuu I maqashiiyay oo I baray, markaas ayay dadku odhan jireen: 'Mee ninka Deyr-cad geel sameeyay.'"

**Gunaanadka taxanaha:**

- **Shakhsiyaddii Ibraahin,**
- **Curintiisii iyo siduu u falkin jiray maansada,**

**Gudniinka Fircooniga ah:**

Caadada waa laga gudbaaye,
Middaa gabdhihii wax yeeshay,
Ee gabowday hablaa ka daaya,

Haddaad gaalleef afaysoo,
Halbowlaha ruux ku goyso,
Waxaad tahay gacan-ku-dhiigle,
Gudniinka hablaa ka daaya,

Waxaan Guullaheen tilmaamin,
Ama aan Nebigii guddoomin,
Bidciyo waa guul-darraane,
Gudniinka hablaa ka daaya,

Innagu gaadh kama ahaannoo,
Sidii geelii ma raacnee,
Garaadkuun baa ilaashee,
Gudniinka hablaa ka daaya,

Ilaahay naxariistii Jano ha ka waraabiyo marxuum-Ibraahin Saleebaan –

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved 